

# Caafimaadka Muwaadinimada la Dhaafay (Citizenship Waived Medical, CWM) iyo COVID-19



## Xubnaha CWM caymis ayey leeyihiin COVID-19-ka.

Ma leedahay CWM oo ma u baahan tahay inaad iska baartid COVID-19? Waad caymisantahay! Ma u baahantahay inaad joogtid isbitaalka sabab la xiriira COVID-19? Waad ku caymisantahay midaas sidoo kale.

Inta lagu jiro xaalada degdegga qaranka ee COVID-19, CWM ayaa bixinaysa qarashka tallaalada, baaritaanka, iyo daaweynta COVID-19. Tani waa run xitaa haddii aadan ku helin daryeel qolka degdega. CWM ayaa weli kaa bixinaysa caymiska, xitaa haddii lagaa waayo COVID-19.

## Waa maxay CWM?

CWM waa caymis gurmada ah oo keliya ah. Waxay dabooshaa daryeelka qolka degdega iyo raacitaanada ambalaansta.

CWM waxa loogu talagalay dadka:

- Buuxiya shuruudaha dakhliga iyo shuruudo kale,
- Da'doodu tahay 26 ilaa 54 jir, iyo
- Aan u qalmin faa'idooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon (Oregon Health Plan, OHP) xaaladdooda soo-galeytinimo darteed.

Dadka da'doodu ka yar tahay 26 jir ee aan buuxin shuruudaha xaaladda soo-galeytinimada waxay u qalmaan OHP oo buuxa iyagoo u maraya [Healthier Oregon](#).

## Caymiska CWM Plus ee loogu talagalay haweenka uurka leh

CWM Plus:

- Waxaa loogu talagalay haweenka uurka leh ee aan u qalmin faa'idooyinka buuxa ee OHP sababo la xiriira xaaladdooda soogalootinimada.

Macluumaad loogu talagalay Xubnaha CWM

- Waxay leedahay isla faa'iidooyinka OHP oo buuxda.
- Ayaa bixisa qarashka kubaxaya tallaalada, baaritaanka iyo daaweynta COVID-19, xitaa isbitaalka gudahiisa.

Caymiska CWM Plus ma dhamaanayo inta lagu jiro xaalada degdegga qaranka ee COVID-19. Faa'iidooyinka dib uma bedelayaan caymiska xaalada degdega kaliya illaa xaalada degdega qaranka ee COVID-19 dhammaato.

## **Waad heli kartaa caawinta luuqad kale ama qaab**

Ma u baahantahay turjubaan? Ma u baahantahay caawinta luuqad kale ama qaab kale? U sheeg xafiiska dhaqtarkaaga ama xarunta caafimaadka markii aad sameyneysid ballan. Haddii aad u baahantahay caawin dheeraad ah, wac 844-882-7889.

## **Ma u baahan tahay caymis caafimaad? Ka codso ONE.Oregon.gov maanta.**

Waxaad ka codsan kartaa mid ka mid ah qaababka soo socda:

- Onleenka: [ONE.Oregon.gov](https://one.oregon.gov)
- Wac: 800-699-9075 (Waqtiyada sugitaanka wuu dheeraan karaa.)
- Caawin lacag la'aan ah ee ka imaaneyso jaalka bulshada deegaanka. Mid ka hel <http://bit.ly/ohplocalhelp>.

## **Wax badan ka baro COVID-19 iyo waxa ka dhacaya Oregon**

- [\(Qorshaha Caafimaadka Oregon\) Oregon Health Plan iyo warbixinta COVID-19](#) ee loogu talagalay xubnaha.
- [Oregon Health Authority COVID-19 updates \(Aqbaaraha Maamulka Caafimaadka Oregon COVID-19\)](#) ee ku saabsan kiisaska, hagida, su'aalaha guud iyo wax badan.
- [ODHS COVID-19 updates \(Aqbaaraha ODHS COVID-19\)](#) ee ku saabsan faa'iidooyinka cuntada, gargaarka degdega ah iyo wax badan.

Macluumaad loogu talagalay Xubnaha CWM

- [Warbixinta Qaranka ee COVID-19](#) ee ka imaaneyso Centers for Disease Control and Prevention (Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka).

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Qorshaha Caafimaadka Oregon kala xiriir 800-273-0557. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.